

**حياة النبي (صلى الله عليه وسلم) أنموذج تطبيقي لصحيح  
الإسلام**

**Nolosha nabiga (N.N.K.H.) waa tusaale camali u ah  
Islaamka saxa ah**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi  
u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(لَقَدْ كَانَ لَكُمْ فِي رَسُولِ اللَّهِ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ لِمَنْ كَانَ يَرْجُو اللَّهَ وَالْيَوْمَ  
الْآخِرَ وَذَكَرَ اللَّهَ كَثِيرًا)

**(Waxaa idinku sugan rasuulka Alle kudayasho  
wanaagsan, ruuxii rajayn Alle iyo maalinta aakhiro,  
Allana xusa in dadan)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee  
mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay  
addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo  
nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa  
iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta  
abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Ilaahay wuxuu soo saaray rasuulkiisa Muxamed -  
naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - asoo

hanuuniye ah iyo bishaareeye iyo asoo ah mid ugu yeeraya Ilaahay, tasoo dhan waa Ilaahay idinikii iyo asoo ah feynuus iftiin leh, Alle wuxuu lasoo diray risaalo khaatimo ah oo caalami ah oo u suubato oona hagaajiso waqti kaste iyo meel kaste, taas waxay keentay inuu ku ahaado rasuulka hadalladiisa iyo falalkiisa iyo dhammaan xaaladahiisa mid tusaale camali u ah Islaamka saxa ah, taasna la yaab ma laha, wuxuu ahaa rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - mid laasimaya manhajka Quraanka xagga xiriirka rabbigiisa iyo xagga xiriirkiisa dadkaoo dhan si kastoo ay ugu kala duwan yihiin jinsigooda iyo midabkooda iyo caqiidooda, sidaa awgeed marka la weyddiiyay muminiinta hooyadooda Caa'isha dabeecadda rasuulka waxay tiri: **(waxay ahayd dabeecaddiisa quraanka).**

Qofka fiirfiirinaya siirada nabiga wuxuu ka helayaa inuu ahaa kan ugu fiican xagga kudayashada dhammaan xaaladihiisa iyo hadalladiisa iyo falalkiisa waxaa ka mid ah arrintaas: runtiisa iyo amaanadiisa: wuxuu ahaa mid runlow ah iyo amiinba intuu noolaa ilaa loogu bixiyay dadkiisa dhexdooda runlowga amiinka ah soo saariddiisa kahor, showqi wuxuu ka leeyahay arrintaas:

لَقَبْتُمُوهُ أَمِينَ الْقَوْمِ فِي صَغَرٍ      وَمَا الْأَمِينُ عَلَى قَوْلِ بِمَتِّهِمْ

**Waxaad u bixiseen amiinka dadka isagoo yar.  
Qofka amiinkana hadal laguma tuhmo**

Hiraql - boqorka Ruum- markuu u yeeray Abuu Sufyaan - islaamnimadiisa kahor - isduu u weyddiiyo rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -, dood dheer ayaa dhex martay waxaa kusoo arooray in Hiraql uu ku yiri Abuu Sufyaan: miyaad ku tuhmi jirteen been intuuna dhihin wuxuu dhahay? Abuu Sufyaan wuxuu yiri: maya wuxuu yiri: ballanka maka baxaa? Abuu Sufyaan wuxuu yiri: maya hadda ayaannu ballan kula jirnaa ma garanayno wuxuu sameyn doono - kaddib wuxuu yiri: iima suurtagalin inaan galiyo erey oo kan aan ahayn, taas macanaheeda oo ah aniga ma helin si aan ugu been abuurto ereygan waxaan ahayn.

Dabciga amaanada si fiican ayuu uga soo muuqday nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - habeenka hijrada barakaysan, wuxuu amray nabiga Cali bin abii daalib -Ilaahay raalli haka noqdee - inuu ku seexo gogoshiisa oo uu sugo si amaanooyinka loo dhiibtay uu ugu celiyo dadkooda iyagoo cadow ku ahaa soona saaray, dhibna u geystay asxaabtiisana dhibay wixii ay haysteenna ka qaatay, maxaayeelay mu'minka uma bannaana khiyaano xataa hadday yihiin cadowgiisa Alle wuxuu leeyahay:

{وَأَمَّا تَخَافَنَّ مِنْ قَوْمٍ خِيَانَةً فَانْبِذْ إِلَيْهِمْ عَلَى سَوَاءٍ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ  
الْخَائِنِينَ}

(Haddaad ka cabsato qoom khayaanadii u tuur (ogaysii) ballankii si siman, Illeen Alle ma jecla khaa'imiinta)

Wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

(أَدِّ الْأَمَانَةَ إِلَى مَنْ أَيْتَمَّنَكَ ، وَلَا تَخُنْ مَنْ خَانَكَ)

(Amaanada u celi qofkii kuu dhiibtay hana khiyaanin qofkii ku khiyaano).

Oofinta rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -: wuxuu ahaa rasuulka midka dadka ugu oofinta badan, waligiisa qofka wejiga uma baddalin mana illaawin qofka fadligiisa qof kastoo wanaag sameeya wanaag ayuu kaga abaalmariyay, wuxuu yiri geeridiisa kahor:

(مَا لِأَحَدٍ عِنْدَنَا يَدٌ إِلَّا وَقَدْ كَافَيْتَاهُ ، مَا خَلَا أَبَا بَكْرٍ فَإِنَّ لَهُ عِنْدَنَا يَدًا يُكَافِيهِ اللَّهُ بِهِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ).

(Qof ma jiro wax nagu leh hadday dhacdo waan ka abaalmarinaynaa, Abuu bakar mooyee waxaa uu nagu leeyahay Ilaahay ayaa ka abaalmarinayo maalinta qiyaame).

Waxaa ka mid ah muuqallada oofintiisa wuxuu u sameyn jiray mu'miniinta hooyadooda Khadiija -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu ahaa qof jecel oo qadariya

mid u oofiyana u ah nolosheeda iyo geerideeda kaddib,  
wuxuu leeyahay asoo caddeynaya darajadeeda:

(مَا أَبَدَلَنِي اللَّهُ (عَزَّ وَجَلَّ) خَيْرًا مِنْهَا ، قَدْ آمَنْتُ بِِي إِذْ كَفَرَ بِِي  
النَّاسُ ، وَصَدَّقْتَنِي إِذْ كَذَّبَنِي النَّاسُ ، وَوَأَسْتَنِي بِمَالِهَا إِذْ حَرَمَنِي  
النَّاسُ ، وَرَزَقَنِي اللَّهُ (عَزَّ وَجَلَّ) وَلَدَهَا إِذْ حَرَمَنِي أَوْلَادَ النِّسَاءِ)

(Ilaahay ma igu baddalin wax iyada ka fiican, waxay i  
aamintay markay dadka igu kufriyeen waxay i  
rummeysay marka ay dadka i beeniyeen, maalkeeda  
ayay igu deeqday marka ay dadka ii diideen, ilaahayna  
ilma ayuu iga siiyay markuu iga reebay ilmaha  
haweenka kale)

Waxay leedahay sayida Caa'isha -Ilaahay raalli haka  
noqdee -:

(مَا غَرْتُ عَلَى أَحَدٍ مِنْ نِسَاءِ النَّبِيِّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، مَا غَرْتُ  
عَلَى خَدِيجَةَ ، وَمَا رَأَيْتُهَا ، وَلَكِنْ كَانَ النَّبِيُّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ)  
يُكْثِرُ ذِكْرَهَا ، وَرُبَّمَا ذَبَحَ الشَّاةَ ، ثُمَّ يُقَطِّعُهَا أَغْضَاءً ، ثُمَّ يَبْعَثُهَا فِي  
صَدَائِقِ خَدِيجَةَ)

(Kama maseyrin haweenka nabiga intaan ka maseyray  
Kahdiija mana arkin iyada laakin nabiga wuxuu badin  
jiray sheegiddeeda waxaaba laga yaabaa inuu gowraco

ri' kaddib uu u jarjaro xubno kaddibna uu u diro  
Khadiija asxaabteeda)

Waxaa ka mid ah oofinta uu u smaeyn jiray dadka aan  
muslkinka ahayn, maalintii Badar wuxuu yiri:

(لَوْ كَانَ الْمُطْعِمُ بْنُ عَدِيٍّ حَيًّا، فَكَلَّمَنِي فِي هَؤُلَاءِ الْأَسْرَى  
لَأَطَّلَقْتَهُمْ)

(Hadduu noolaan lahaa Mudcim bin Cadiy oona igala  
hadli lahaa qafaalkan waan u deyn lahaa), Mudcim  
wanaag ayuu u sameeyay rasuulka marka uu Makka soo  
galay asoo kasoo noqday safarkii Daa'if.

Waxaa ka mid ah sidoo kale oofintiisa xagga  
cadowgiisa xataa xilliga dagaalka, waxaa laga wariyay  
Xudeyfa bin Alyamaan - Ilaahay raalli haka noqdee -  
maalinta Badar inuu yiri: Badar inaan ka qaybgalo igama  
reebin arrinkan mooyee kaasoo ah aniga iyo  
aabbahayga ayaa soo baxnay waxaa na qabsaday  
gaalada Qureysh waxay dhaheen: idinka Muxamed  
ayaad u socotaan waxaan niri: uma socono, uma jeedno  
waxaan Madiina ahayn, waxay nala galeen ballanka  
Ilaahay inaan madiino aadeyno oo aanan la  
dagaallameynin, waxaan u nimid rasuulkii Ilaahay -  
naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - waxaan u  
sheegnay warka wuxuu yiri: **(iska baxa ballankooda**

ayaan u oofinaynaa Ilaahayna waan u kaalmaysanaynaa).

Sidoo kale wuxuu ahaa nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - tusaale fariid ah iyo kudayasho wanaagsan markuu la dhaqmayay haweenkiisa, wuxuu kula noolaaday nabiga haweenkiisa nolaol fiican, waxaa ka muuqatay naxariis iyo jacayl iyo tawaaduc iyo dabacsanaan, nabiga iskama korreysiinin haweenkiisa wuxuu wanaajiyay mucaamaladooda dhammaan isagoo ka shidaal qaadanaya oraahda Alle:

{وَعَاشِرُوهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ}

(Kulana Noolaada si Fiican), iyo oraahda Alle subxaanahu:

{وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُمْ مَوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ}.

(Waxaa ka mid ah calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray naftiina haween si aad isugu xasishaan, yeelayna dhexdiina isjacayl iyo naxariis, taasina waxaa ugu sugan calaamad qoomkii fikiri)

Wuxuu ahaa rasuulka sowj dhimrin badan, si fufud ayuu kula dhaqmi jiray xaasikiisa, muuqaal insaani ah sowj naxariis badan oo xaaskiisa la joogo, nabiga wuxuu ka qaadayaa raadka oohinta xaaskiisa mu'miniinta hooyadooda Safiya -Ilaahay raalli haka noqdee - labadiisa gacmood sharafta badan ayuu kaga tirtirayaa

indhaheeda wuxuuna ka dejinayaa cabsideeda, wuxuu leeyahay Anas bin Maalik -Ilaahay raalli haka noqdee -: (Safiya waxay kula jirtay rasuulka safar maalintaasna waxay ahayd maalinteeda, waxay kusoo daahday socdaalka wuxuu ka hortagay rasuulka iyadoo oynaysa oo leh: waxaad i saartay rati aayar u soconaya wuxuu bilaabay rasuulka Alle inuu kaga tirtiro gacmihiisa indhaheeda oona aammusiyo).

Sidoo kale wuxuu ahaa rasuulka kudaysho wanaagsan markuu la dhaqmi jiray ilmihiiisa iyo ilmaha ay dhaleen ilmihiiisa, maxaa ka weyn aabbe iyo awoowe naxariis badan, ilmihiiisa iyo ilmaha ay dhaleen wuxuu u hayn jiray jacayl iyo naxariis iyo dhimrin, waxay leedahay mu'miniinta hooyadooda sayida Caa'isha -Ilaahay raalli haka noqdee - :

(مَا رَأَيْتُ أَحَدًا أَشْبَهَ سَمْتًا وَدَلًّا وَهَدِيًّا يَرْسُولِ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) مِنْ فَاطِمَةَ بِنْتِ رَسُولِ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، قَالَتْ : وَكَانَتْ إِذَا دَخَلَتْ عَلَى النَّبِيِّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، قَامَ إِلَيْهَا ، فَتَقَبَّلَهَا ، وَأَجْلَسَهَا فِي مَجْلِسِهِ...).

(Ma rkin qof kaga dhow xagga qaabka iyo dhaqanka rasuulka Alle Faaduma, wuu u istaagay wuuna dhunkaday, wuxuuna fariisiyay fadhigiisa...)



Waxaa laga wariyay Abuu Hureyra -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: nabiga ayaa dhunkaday Xasan bin Cali waxaa agtiisa joogay Al-aqrac bin Alxaabis Atamiimi wuxuu yiri Al-aqrac: toban ilmo ayaan haystaa waligaygana ma dhunkanin mid ka mid ah, waxaa eegay rasuulka kaddib wuxuu yiri:

(مَنْ لَا يُرْحَمُ لَا يُرْحَمُ)

**(Qofkaan naxariisanin looma naxariisto).**

Maalin nabiga wuu sujuuday wuxuu dheereeyay sujuudda, markuu salaadda dhameeyay dadkii ayaa yiri: (rasuulkii allow salaaddaada tan ah waxaad ku sujuudday sujuud aadan waligaaga sujuudin, ma wax lagu amray baa? ama laguu waxyooday? wuxuu yiri rasuulka:

(كُلُّ ذَلِكَ لَمْ يَكُنْ ؛ وَلَكِنْ ابْنِي ارْتَحَلْنِي ، فَكَرِهْتُ أَنْ أَعْجَلَهُ حَتَّى يَقْضِيَ حَاجَتَهُ)

**(Waxaas oo dhan ma aha, laakin wiilkayga ayaa korka iga soo fuulay waxaan nacay inaan dedejiyo ilaa uu dadntiisa ka dhammaysto).**

Waxaan adkeynaynaa in arrinkan uusan gaar u ahayn ilmihisa ama ilmaha ay dhaleen kaliya, ee wuxuu u ahaan manhaj uu ku dabbaqayo dhamaan, ma kala sooci jirin dadka, dhammaan ayuu ixsaan u sameyn jiray, waxaa laga wariyay Usaama bin Zayd -Ilaahay raalli haka

noqdee - in nabiga qaadi jiray isaga iyo Xasan, wuxuu dhihi jiray:

(اللَّهُمَّ إِنِّي أَحِبُّهُمَا، فَأَحِبَّهُمَا)

**(Ilaahayow labadan waan jeclahay adigana jeclow)**

Waa kanaa Anas bin Maalik -Ilaahay raalli haka noqdee - oo leh:

(خَدَمْتُ رَسُولَ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) عَشْرَ سِنِينَ، فَمَا قَالَ لِي  
أَفِّ قَطُّ، وَمَا قَالَ لِي شَيْءٍ صَنَعْتُهُ، لِمَ صَنَعْتُهُ؟، وَلَا لِي شَيْءٍ تَرَكْتُهُ، لِمَ  
تَرَكْتُهُ؟)

**(Waxaan u adeegay rasuulka Ilaahay toban sano ima dhihin waligiisa uf wax aan sameeyayna ma dhihin maxaad u sameysay? wax aan ka tagayna maxaad uga tagtay?).**

Sidaas oo kale nabiga wuxuu ahaa tusaale lagu daydo sida wanaagsan uu kula dhaqmi jiray asxaabtiisa, wuxuu la wadaagi jiray farxaddooda iyo murugtooda, wuu raadin jiray badankooda wuxuu booqan jiray kooda jirran wuxuu ku dadaali jiray arrimahooda, wuxuuna ilaalin jiray dareenkooda, arrimahooda oo dhan, waxaa laga wariyay Samaak bin Xarb inuu yiri: waxaan ku iri Jaabir bin Samura -Ilaahay raalli haka noqdee -: (mala

fariisan jirtay rasuulka? wuxuu yiri: haa in badan, kama soo kici jirin meesha uu ku tukaday salaadda subaxa ilaa ay qorraxda kasoo baxdo, markay soo baxdo wuu istaagi jiray, way sheekaysan jireen waxay gali jireen sheekada jaahiliyada way qosli jireen wuu dhoollacaddeyn jiray).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay  
ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

\*\*\*

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena Muxamed inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan, iyo dadkii ku raacay wanaag ilaa maalinta abaalmarinta.

#### **Walaalaha islaamka ahow:**

Siduu ugu ahaa nabiga tusaale camali ah islaamka saxa ah, dadnimadiisa iyo akhlaaqdiisa ayuu tusaale ugu ahaa dhexdhexaadkiisa: qofka fiirfiiriya axkaamta shareecada oo uu ugu yeeray rasuulka wuxuu arkayaa minhajka dhexdhexaadka inuu dhinac walba kaga muuqdo waxay leedahay Mu'miniinta hooyadooda Caa'isha:

(مَا خَيْرَ رَسُولٍ اللَّهُ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) بَيْنَ أَمْرَيْنِ إِلَّا اخْتَارَ  
أَيَسْرَهُمَا ، مَا لَمْ يَكُنْ إِئْتِمًا ، فَإِذَا كَانَ إِئْتِمًا كَانَ أَبْعَدَ النَّاسِ عَنْهُ)

(Rasuulka Alle labo arrin lama doorgaliyo hadday dhacdana wuxuu dooran jirin kan ugu fudud hadduuna ahayn dambi, hadduu dambi yahayna wuxuu ahaa kan kaga fogaansho badan dadka), wuxuu yiri:

(إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ، وَلَنْ يُشَادَّ الدِّينَ أَحَدٌ إِلَّا غَلَبَهُ، فَسَدِّدُوا، وَقَارِبُوا،  
وَأَبْشُرُوا، وَاسْتَعِينُوا بِالْعَدْوَةِ وَالرَّوْحَةِ، وَشَيْءٍ مِنَ الدُّجَةِ)

**(Diinka wuu fudud yahay, qof iskuma adkeeyo haddii kale wuu ka adkaanayaa, toosiya dhexdhexeysta bishaareysta, kaalmeysta arootii iyo galabtii iyo qeyb ka mid ah dheelmashada)**

Sidii loo ilaalin lahaa awgeed dhexdhexaadka wuxuu ka digay nabiga dhammaan qaababka xadgudubka, xadgudubka diinta wuxuu ku inkiray kuwa ka mid ah asxaabtiisa in lagu xeeldheeraado cibaadada si ka baxsan dhexdhexaaka, wuxuu yiri:

(يَا أَيُّهَا النَّاسُ: إِيَّاكُمْ وَالْعُلُوفِ فِي الدِّينِ، فَإِنَّمَا أَهْلَكَ مَنْ كَانَ قَبْلَكُمْ  
الْعُلُوفِ فِي الدِّينِ)

**(Dadow iska jira xadgudubka diinta dadkii idinka horreeyay waxaa halaagay xadgudubka diinta).**

Waxaa inooga baahi badan inaan ku dayano rasuulka Alle hadyigiisana aan qaadano raadkiisana aan raacno xagga fidinta risaalada nuurka iyo hanuunka iyadoo saafi

ah oo cuntamaysa ahna sidii Alle ugusoo dejiyay dadka oo dhan dabacsanaan aayar iyo naxariis iyo isu keenidda quluubta risaalada islaamka, waa cadaalad dhammaanteeda, waa naxariis dhamaanteeda, waa ismasaamixid dhamaanteeda, waa waxtar dhamaanteeda, waa dadnimo dhamaanteeda.

**Ilaahayow nagu arsaq jacaylkaaga iyo jacaylka rasuulkaaga, iyo camal kaste oo jacaylkaaga noo dhoweynaya, masarteenana nooga dhig amaan iyo nabadgelyo iyo dhammaan dalalka caalamka.**